# Adiga oo ah dhibbane dembi, Minnesota waxay ku siinaysaa xuquuq muhiim ah maaddaama kiiskaagu uu u socdo nidaamka cadaaladda dembiga.

## MARKA FAL-DAMBIYEEDKA LA SOO WARGALIYO WAKAALADDA FULINTA SHARCIGA

**Xaq ayaad u leedahay in aad:**

- Wakaaladda fulinta sharciga weydiisato in ay aqoonsigaagu laqariyo marka warbixinnada la siinayo dadweynaha. (Macluumaadka ku saabsan faraxumeynta galmada iyo dhibbanayaasha faraxumeynta ilmaha si toos ah ayaa loo qarinaya.)
- Lagu ogeysiiyo xuquuqda dhibbanaha dhibbanaha sharci fulinta oo ay ku jiraan xuquuqda codsiga magdhawga.
- Waxaa lagu siinayaa macluumaad ku saabsan barnaamijka gargaarka dhibbanaha ee kuugu dhow ama ilaha.
- Codso magdhow (magdhow lacageed) oo ku saabsan wixii kasoo haray khasaaraha hantida oo aan la xiriirin dembi rabshad leh.
- Xaaladaha dambiyada rabshadaha iyo xadgudubyada qoyska oo dad loo soo xiray, waa in lasiiyaa ogeysiis ah in la sii daayo dembiilaha iyada oo la raacayo macluumaadka ku saabsan xaaladaha sii deynta iyo hay'adda kormeerka.
- Xaaladaha dilka, waa in la ogeysiiyaa xuquuqda iyo hababka badbaadinta hantida marxuumka.

## MARKA KIISKA DACWADDA LA QAADAYO

**Xaq ayaad u leedahay in lagula socodsiiyo waxa la xariira:**

- In lala socodsiiyo dacwad oogidda kiiska iyo habka dacwad oogidda.
- Codso magdhow (magdhow lacageed) khasaaraha aan hantida lahayn ee la xidhiidha dembiga gacan ka hadalka ah.
- In lagu wargeliyo soo jeedinta gudbinta ka hor ee ah dembiyada rabshadaha wata qaarkood oo bixi talo.
- Ka qaybgal dacwadaha maxkamadda marka qofka dambiga galay uu yahay da'yar.
- Lagu ogeysiiyo isbeddelka jadwalka dhageysiga haddii lagu yeero ama lagu weydiisto inaad marqaati furto.
- Codso magdhow eedaysanaha haddii uu jiro xukun.
- Lagu wargeliyo waxa ku jira heshiiska qirashada la soo jeediyay.
- Waydii xeerilaalinta inuu codsado maxkamadayn degdeg ah.
- Lagu ogeysiiyo oo ka soo qaybgal qirashada iyo dhageysiga xukunka.
- Diidmo soo jeedinta heshiiska qiraalka dhegeysiga dacwadda qoraal ama hadal, ama ka codso xeer-ilaaliyaha inuu kuu gudbiyo diidmadaada.
- Lagu ogeysiiyo u-qalmitaanka si toos ah u baabi'inta dembiyada kiiska, oo ay ku jiraan kuwa shaqada laga eryay ama eedaysanaha lagu xukumay ama lagu sii daayay.
- Haddii baaritaanka soo-bandhigidda la sameeyo, bixi macluumaadka ku saabsan saameynta dembiga iyo mowqifkaaga ku saabsan habka la soo jeediyay.
- Si qoraal ah ama hadal ah u bixi bayaan saamaynta dhibbanaha ee dhegeysiga xukunka.
- Haddii xubin bulshada ka mid ah, bixi hadal saamaynta beesha marka dhegeysiga xukunka.

**Xuquuqda qaarkeed waxay ku lugleeyihin amaankaaga, keli-ahaanshahaaga, iyo dhowristaada, ay ku jiraan xaqa aad u leedahay:**

- In lagula socodsiiyo iyo lagu siiyo waxa aad ka qabto dhegaysiga lacag damaanad ah marka ay jiraan xaalado gaboodfal iyo xadgudubyada guriga.
- Meel ammaan ah ama wax kaa dhawra dembiilaha ama tageerayaashiisa inta maxkamadda lagu jiro.
- Warbixitna handadaadda marqaatiyada ama jabinta amarrada sharciga ah in ammaan lagu siiyo ama faraha lagaa qaado.
- Weydiiso in cinwaannada gurigaaga iyo shaqada, lambarrada telefoonnada, iyo taariikhda dhalashada in laga xannibo dembiilaha iyo madaasha maxkamadda.
- In laga badbaadiyo adiga iyo qoyskaaga argoosiga ka imaanaya shaqaaleeyaha marka aad qaadanaysid shaqo joojis muddo caqligalka ah sii aad uga qaybqaadatid dhegaysiyada ama uga maragfutid gaboodfalka (ay kujiraan xadgudubyada guriga, faraxumeynta galmada iyo gaatimidda)
- Marka ay jiraan xaalado dil, in la bixiyo amar maxkamadeed ee ka hortagaya in uu dembiilaha iibiyo hantida dhibbanaha. Sharcigu waa in uu kahortago in uu dembiilaha dembiga kafaaido.

**Ka dib marka dambiilaha la xukumo, waxaad xaq u leedahay inaad:**

- Wargelinta natiijada kiiska.
- n la ogeysiiyo xuquuqaha marka dambi lagu helo kadib.
- Ogeysiinta sii-deynta ama ka baxsashada haynta dambiilaha xarunta xarigga ama xabsiga ama loo wareejiyo xarun ammaan oo hoose, haddii la codsado.
- Samaysashada codsi aan shaaca laga qaadayn kaaso maxkmaddu ay ku amrayso in baaritaanka HIV laga qaado eedaysanaha la xukumay marka ay jiraan xaalado kufsasho iyo gaboodfallo ah.
- Wargelinta rafcaanka iyo xaqa aad u leedahay inay ka soo qayb galaan dhageysiga la xiriira iyo in la ogeysiiyo natiijada rafcaankaas,
- Kiisaska dembiyada culus ama dhacdooyinka rabshadaha wata, isbeddelka la soo jeediyey ee xukunka, dhageysiga la xiriira, iyo xaqqa bixinta talooyinka.
- Wargelinta codsi ku saabsan xayiraadda iyo xaqa loo leeyahay in la maqlo, marka la codsado.
- Si loo ogeysiiyo codsi ah inuu si xaq ah u geysto dembiilaha, natiijada codsigaan, iyo, haddii la geysto, sii-deyn / dheellitir, marka la codsado.
- In la ogeysiiyo qofka dambiilaha ah codsi qoraal ah oo xabsiga lagu dhigayo si shibil ah iyo natiijada codsigaas. Haddii la amro xiris si shibil ah, dhibanuhu wuxuu codsan karaa in la ogeysiiyo marka dambiilaha la sii daayo ama marka xaaladda uu isbedel kale ku yimaado.

**Si wax looga qabto saamaynta dhaqaale ee dembiga uu sababay, xaq ayaad u leedahay in aad:**

- Dalbtid magdhaw (magdhaw dhaqaale) ee aan ahayn khasaaraha hantiyeed ee dembiga la xariira.
- Dembiilaha ka raadsatid qaan-celinyo ee kharashyada kaaga baxay falal si toosa ula xariira dembiga haddii dembiilaha la xukumo.
- Weydiisatid dembiilaha sarkaalkiisa asluubta in uu kuu qabto dhegaysi haddii dembiilaha bixinwaayo qaan-celinyada
- Khasaarahaaga aad dacwad madani ka xarasysato dembiilaha khasaarahaaga, haddii dacwad dembi ah laga xareeyay iyo haddii kaleba.

## RABSHADAHA GURIGA, GARABKA GALMADA, DHIBAATOOYINKA IYO DHACDADA

**Xaq ayaad u leedahay in aad:**

- Warbixin ka heshid xeerilaaliyaha waxa ku saabsan go'aan kasta ee laga gaarayo ka rebitaanka ama ka saariidda kiiska marka ay jiraan macluumaad ku saabsan amarka maxkamadeed si lacag la'aan ah
- Ka baxdo heshiis kiro oo aan ganaax lahayn si ad uga badbaadid xaalad bahdilka.
- haddii aad tahay dhibbanaha bahdil, in aad Lacag la'aan ku qaadatid koobiga warbixinta Dhacdada wakallada ammanka ee u xilsaaran ee lagaa rabo in aad qorto.
- Hadii aad tahay Dhibannaha xadgudubyada guriga, Weeydisato
- haddii aad tahay dhibbanaha xadgudubka galmada, waa in aad Lacagla'aan ku qaadatid baaritaanka cafimaadka qarsoodiga marka uu dhaco xadgudubka galmada iyo rugta caafimaadka ay ku siiso ogaysiiska xuquuqda iyo ilaha
- Haddii aad tahay dhibane xadgudub galma ah, kala dooro in lagu siiyo qalabkii lagu baaray xadgudubka galmada, oo hel macluumaad la xiriira xaaladda qalabkii baarista loo diray.
- Diidid baaritaanka wareysiga mashiinka xaqiiqada baaraya ayadoon aysan la socon saamaynta ah in uu jiri doono baaritaan ama sharcimarinta la fulinayo haddi aad tahay dhibbanaha xadgudubka galmada.

### QEEXITAANKA DHIBBANAHA DEMBIGA

Siduu qorayo sharciga Minnesota, dhibbanaha dembiga waxaa lagu qeexayaa qof ay soo gaartay dhib ama dhaawac sababo la xariira fal dambi. Dhibaanaha waxaa ka mid noqon karah xubin qoyska, ilaaliyaha, masuulka qof da'yar, qof aan masuuliiyad qaadi karin, qof naafa ah, ama qof dhintay.

## Su'aalaha inta badan la Is Weydiiyo

### Sideen ku ogaan karaa xaaladda kiiskayga?

Wac lambarka hay'adda sharci fulinta ee soo qaadatay warbixintaada si aad u ogaato xaaladdaada kiiskaaga. Haddii wali uu socdo baaritaan, weydiiso lambarka baaraha si aad u weydiiso su'aalo dheeraad ah. Haddii kiiskaaga loo soo bandhigo xafiiska xeerilaaliyaha, weydii magaca xafiiska iyo lambarka si aad u sameyso su'aalo dheeraad ah.

### Sideen u heli karaa Koobiga warbixinta sharci fulinta?

Wac (adigoo isticmaalaya lambarka xaalada deg dega ah) ama booqo wakaaladda sharci fulinta ee warbixinta kaa qaaday si aad u waydiiso sida loo codsado koobiga warbixinta. Waaxyo badan ayaa kuleh website-kooda macluumaad ku saabsan qaabka loo qabto. Awooddaada inaad hesho koobi buuxa ee warbixinta waxay ku xiran tahay xaaladda baaritaanka iyo nooca kiiska.

### Miyaan xaq u leeyahay in aan dacwad soo oogo ama la tuuro?

Go'aanka lagu soo oogayo dacwad ka dhan ah dambiile wuxuu ku fadhiyaa xafiiska xeerilaaliyaha. Xaq uma lihid in la soo oogo dacwad ama la tuuro, laakin waxaad u gudbin kartaa rabitaankaaga shaqaalaha caddaaladda dambiyada ee ka shaqeeya kiiskaaga. U doodaha dhibanaha ee xafiiska xeerilaaliyaha ama mid ku salaysan bulshada ayaa kaa caawin kara inaad la xiriirto baarayaasha iyo xeer-ilaaliyeyaasha kuwaas oo hayya kiiskaaga. Waxaad la xiriiri kartaa Khadka Taageerada Dhibbaneyaasha ee Minnesota ee 866-385-2699 si aad u heshid caawimo gudbin haddii aadan haysan lambarka laga xiriiro gargaarka dhibbanaha ama xafiiska xeer ilaaliyaha.

### BIXINTA OGEYSIISKA XUQUUQDA DHIBBANAYASHA

Wakaaladaha ammaanka waxaa lag rabaa inay ogyasiiyan dhibbanayaasha dembiga xuquuqda qaarkood oo ay dhibbanayaasha leeyihiin iyo ilaha deegaanka marka ugu horreeysa ee lala soo xariirayo.

Xeerilaaliyasha waxaa laga rabaa in ay siiyaan dhibbanayaasha ogaysiiska xuquuqda marka dacwad la xareeyo.

### Maxay tahay magdhowga (kaalmo lacageed)?

Haddii aad tahay dhibbane dembi rabshad leh oo aad haysato kharashyada ka baxsan daryeelka caafimaadka, la-talinta, aaska, mushaharka lumay, ama kharashyada kale, waxaad xaq u yeelan kartaa kaalmo lacageed ee barnaamijka magdhowga. Waxaad wacdaa Guddiga Dhibbanayaasha Dambiyada ee Minnesota 651-201-7300 inta lagu jiro saacadaha ganacsiga si aad ula hadasho shaqaalaha guddiga magdhowga si aad u ogaato barnaamijka iyo habka codsiga.

### Ma tagi karaa dhammaan dhageysiyada?

Haa. Guud ahaan, dacwadaha maxkamadeed ee ku lug leh eedaysanayaasha qaangaarka ah waxay u furan yihiin dadweynaha. Garsoorku ayaa xiran kara dhageysiyada ama ka-saarida xisbi xaaladaha qaarkood. Dhibbanayaasha kiisaska ku lug leh dambiilayaasha dhallinyarada ah ayaa laga yaabaa inay ka soo qayb galaan dacwadaha maxkamadeed.

### Xuquuqda dhibanayaasha dembiga ma khuseeyaan marka dembiiluhu yahay qof da' yar?

Haa, xuquuq isku mid ah ayaa lagu dabaqayaa kiisaska qaangaarka iyo da' yarta.

### Sideen ku ogaan karaa xilliga dembiilaha xarigga ama xabsiga laga siidaynayo?

Xukunka kahor, xabsiga ama rugta xarigga waa in lala socodsiyaa dhibbanaha gaboodfalka dembiilaha siidayntiisa. Dhibbanayaasha oo dhan, dembi kasta ee laga galay, waxaa lagu dhiirigalinayaa in ay iska diiwangeliyaan barnaamijka **VINE** (Macluumaadka Dhibbanaha iyo La Socodsiinta Maalin Kasta) si ay ku codsadaan siidaytna quumatiga ah. Kaddib marka dembiga lagu helo, dhibbanayaasha maxaabiista ku jira xabsiga waa in ay sameyaan codsi ah ogaysiiska siidaynta ee rugtaas.

Haddii aad ay kula tahay in lagu xadgudbay xuquuqdaada dhibbane ahaan, ka wac Cutubka Caddaaladda Dhibbanaha Dambiga (Crime Victim Justice Unit).

651-201-7310 | cvju.ojp@state.mn.us

## Ilaha

### Xilliga dembiiluhu uu xiranyahay:

Si lagu codsado ogaaysiinta siidaynta xaabsiilaha ama lagu helo macluumaadka kale ee xabsiyaynta:

**Xabsiyada Degmada iyo rugaha xarigga:**
Si toos ah u wac xabsiga ama isticmaal Minnesota VINE:
1-877-664-8463 | www.vinelink.com

**Minnesota Wasaarada Xeryaha Edbinta**
Minnesota CHOICE
www.minnesotachoice.com
DOC Mashruuca Caawimada Dhibanaha
800-657-3830

### Macluumaadka ku saabsan magdhawga dhaqaale ee kiisaska dembiyada rabshadaha, wac:

Gudiga Magdhowga Dhibanaha Danbiga
651-201-7300 • 1-888-622-8799
ojp.dps.mn.gov

### Si aad ula xariirto ilaha deegaanka

MN Khada Cawimada Dhibanaha Danbiga:
866-385-2699 (Assistance to victims of crime)

Day One Crisis Line: 866-223-1111
(Xadgudub guri, weerarka galmada, tahriibinta)

Si aad u hesho adeegyo faraxumeynta galmo:
mncasa.org/find-help

### Su'aalaha ku saabsan xuquuqda dhibanaha dembiga iyo xadgudubyada suurtogalka ah ee la xiriira, la xiriir

Qeybta Cadaaladda Dhibbanayaasha Dembiyada
651-201-7310 | cvju.ojp@state.mn.us


### Nalasoo Xariir

Office of Justice Programs
Xafiiska Barnaamijyada Caddaaladda
445 Minnesota Street, Suite 2300
St. Paul, MN 55101-1515
E-mail: dps.justiceprograms@state.mn.us
Bogeena: ojp.dps.mn.gov
651-201-7300 | 888-622-8799



06/26
Crime Victim Rights - Somali


# Xuquuqda Dhibbanaha Dembiga

## CRIME VICTIM RIGHTS




Xafiiska Barnaamijyada Caddaaladda
OFFICE OF JUSTICE PROGRAMS

WAAXDA AMMAANKA GUUD EE MINNESOTA
MINNESOTA DEPARTMENT OF PUBLIC SAFETY